

Xoojinta Qaabka Maamulka Hogaaminta

Dul-marka Guud

In la helo hogaamin tayo saro leh dhamaan heerark kastaba maamulka degmada si oo u gaaro guulaha muhiimka ah. Lagana bilaawo dhismayaasha dugsiyada ilaa xarunta dhexe ama ilaa gudida sare degmada, dugsiyada degmada waxay si xoog leh ugu tiirsan yihiin hogaamiyaha u horseedo kooxyo wadajir ah iyo maamul lagu gaaraayo guulaha ujeedooyinka.

Hogaamiyaasha waxaa laga helaa heerarka qaababka kale duwan, waxaynu u baahanahay in ay gargaarno hogaamiyaasha isla markaana aynu shaqaalayno hogaamiyaal cusub. Waxaa kaloo u baahanahay in aynu abuurno hab hagaajin ah qaabka shaqaalaha, shaqaalo leh tayo sare lana siiyaa xirfad leh fursad koritaanka dalacsiinta mustaqbilka shaqadooda. Degmada waxay ahmiyada siinaysaa qaabka shaqaalaynta iyo habka loo gargaari lahaa shaqaalaha sanadaha soo socdo.

Qodobada Muhiimka ah

Waxaa jira qaybo fara badan aynu ahmiyada-saareeyno sanadkaan.

Hagaajinta Qaabka Shaqaalaynta – Dugsiyada Dadweynaha Seattle waa in shaqaalayn ku sameeyaan shaqaalaha degmooyinka dugsiyada dariska aynu nahay iyo isticmaalka habka la tartamida. Taas waxay keenaysaa in la helo qandaraas natiijo macalimiin tayo sare leh iyo kala doorsho musharaxiinta codsiga shaqaalaha degmooyinka kale ah. Waxaynu horumarinaynaa habka shaqaalaynta waqti hore oo ku haboon. Waxaana rajeyneynaa qaabka horumarinta shaqaalaynta macalimiinta, maamulayaasha dugsiyada iyo shaqaalaha kale in oo hirgalo lixda bilood oo soo socdo.

Rajooyinka Laga Sugaayo iyo Siinta Gargaarka – Dugsiyada degmooyinka leh wax-qabadka sare waxay leeyihiin rajooyin laga sugaayo dhamaan xubnaha shaqaalaha iyo in la siiyo cawinaada u muhiim ah shaqaalaha gaaritaanka rajada laga sugaayo. Shaqaalaha waxaa la siinayaa xifada iyo akhbaaro xoojinayso tayadooda, waxaa kaloo la sameeynaya qiimeynta dalacsiinta iyo dib u dhigida. Lixda bilood oo soo socdo, waxaa la qiimeynayaa xariirka iyo xirfada shaqaalaha, macalimiinta iyo maamulayaasha dugsiyada si loo hubiyo bar-tilmaameedka looga baahan yahay shaqaalaha ahmiyad-siinta xeeladaha qorshaha aqoonta (gaar ahaan xisaabta iyo sayniska).

Wax-tarka Horumarinta iyo Hirgalinta Qiimeynta Sanadka – Shaqaalo fara badan waxay helaan qiimeynta sanadka tayo sare leh, kana mid ah cadeeynta himilooyinka, qiimeynta joogtada iyo garashada gargaarka looga baahan yahay guulaha. Waxaynu u baahanahay dhamaan shaqaalaha in la siiyo fursad ay ku hagaajinayaa xirfada wax-qabadkooda loogu talagalay. Sanadaha soo socdo, waxaynu qorshayneynaa in aynu soo bandhigno qiimeyn cawineeyso dhamaan shaqaalaha heer kastaba ee degmada.

Su'aaladaha Ururada

- Maxaa rabtaa in aad si fiican u barato?
- Maxaa kuu cadeeyn?
- Maxaa anaga naga maqan?
- Sidee baa u jeceshahay in laugu siiyo akhbaaraha aad ugu qaybgalayso shaqadaan?